

## Wasaaradda Waxbarashada ee NSW

### Notice of expulsion - serious behaviour/s of concern

Using the telephone interpreter service to contact the school

## Ogeysiiska cayrinta - dabeecad/o daran oo la saluugo

Isticmaalida adeega turjumaanka taleefanka si aad dugsiiga ula xiriirto

Magaca ardayga

Name of student

Gacaliye xannaaneeye/waalid

Warqada ku lifaaqan ayaa sharxaysa faahfaahinta ogeysiiska cayrinta - dabeecad/o daran oo la saluugo ee aan u siiyey ilmahaaga sida waafaqsan nidaamka Cayrinta iyo dugsi ka Joojinta iyo Qorshaha Dabeecada Ardayga ee Wasaaradda Waxbarashada NSW.

Ilmahaagu dugsiiga wuu ka maqnaanayaa intaan isku dayeyno helida goob waxbarasho oo bedel ah. Qof dugsiiga ka socdaa ayaa kaala soo xiriiri doona wax ku saabsan talaabooyinka ku xigga.

Waxaa ku lifaaqsan macluumaadka aad u baahan tahay inaad ogaatid haddii ilmahaaga la cayriyo.

Haddii aad dhib kala kulanto fahmida warqada ku lifaaqan, fadlan la xiriir dugsiiga si aan u sharaxno. Haddii aad u baahan tahay caawimaada turjubaan markaad la xiriiraysid dugsiiga, fadlan wac 131 450 oo weydiiso turjubaan luuqadaada ah. U sheeg xiriiriyuhu inuu kuu waco lambarkaad dooneysid inaad wacdo, waxayna khadka soo gelin doonaan turjubaan kaa caawiya wada hadalka. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.

Magaca Maamulaha

Name of Principal

Lambarka taleefanka Maamulaha

Principal's phone number